

WASAARADDA MAALIYADDA
DOWLADDA KOONFUR GALBEED
SOOMAALIYA

Buugga Hagaha **Canshuur-bixiyaha**

**“Noqo Canshuur-bixiye
Hormariya Dalkiisa”**





FARIINTA WASIIRKA

H.E : Ahmed Mohamed Hussien
Wasiirka Maaliyadda, Dowladda
Koonfur Galbeed Soomaaliya

Ugu horreyn, waxaa mahad oo dhan iska leh Allah SWT oo inoo suurtageliyay dhamaystirka buugga hagaha canshuur-bixiyaha ee Wasaaradda Maaliyadda Dowladda Koonfur Galbeed Soomaaliya. Buuggan waxa loo diyaariyey in uu u fududeeyo shacabka Koonfur Galbeed in ay si cad u fahmaan nidaamka canshuuraha ee dowladda, isla markaana uu ka qeybqaato dhismaha nidaam daahfuran, oo ku dhisan kalsooni, isla xisaabtan iyo wada shaqayn.

Buuggan waxa uu soo koobayaa macluumaad muhiim ah oo ku saabsan cashuuraha ay Dowladda Koonfur Galbeed qaado, Waxa uu cashuur-bixiyayaasha ka caawinayaa in ay si fudud u fahmaan waajibaadkooda sharci, taas oo yareynaysa jahwareer, iyo dib u dhac ku yimaada canshuur-bixinta, Dhanka kale, wuxuu sare u qaadaya fahamka shaqaalaha dakhli ururinta, si ay u helaan tilmaamo fudud oo ku salaysan xeerka dakhliga ee 2025.

Canshuuraha waa laf-dhabarka horumarka dalka, Waxa ayna muhiim u yihiin maalgelinta adeegyada asaasiga ah sida caafimaadka, waxbarashada, amniga, biyaha, nadaafadda, iyo horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha sida waddooyinka, garoomada, dekedaha iyo wax soo saarka beeraha, xoolaha, iyo kalluumeysiga, Waxa ay sidoo kale gacan ka geystaan yareynta ku-tiirsanaanta kaalmada dibadda, iyo socod siinta hawlaha dowladda.

Ugu dambayn, waxaan ku dhiirrigelinayaa dhammaan ganacsatada, hay'adaha, iyo muwaadiniinta reer Koonfur Galbeed in ay si joogto ah u bixiyaan cashuurta, una hoggaansamaan shuruucda dalka. Canshuurtaada waa laf dhabarta dib u dhiska dalka, dhismaha dowlad adag oo adeegyo hufan bixisa, iyo horumar waara iyo baraare ay wada gaarto bulshada Koonfur Galbeed Soomaaliya.



CUTUBKA 1aad: **CANSHUURAHHA IYO CASHUUR-BIXIYAHHA**

Waa Maxay Canshuur?

Canshuurtu waa qaaraan sharciga ku waajibiyay muwaadinka, hay'adaha, ganacsiga, iyo wax is-dhaafsi kasta oo dhaca si loogu fuliyo hawl-maalmeedka dowladda. Cashuurtu waxa ay ka dhigan tahay iskaashi u dhexeeya dowlad iyo dadkeeda, si loo gaaro horumar iyo adeegyo hufan.

Maxaa Lagu Qabtaa Canshuurta?

Canshuuraha waxaa lagu bixiyaa adeegyada bulshada sida amniga, caddaaladda, caafimaadka, waxbarashada, biyaha, wax soo saarka beeraha, xoolaha, iyo horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha sida waddooyinka, dekedaha iyo garoomada.

Yay Canshuurta Ku Waajibtay?

Canshuurtu waxay ku waajibtay qof kasta oo shaqsi ah, shirkad, ganacsi, ama hay'ad dakhli ka helaya gudaha deegaanada Dowladda Koonfur Galbeed Soomaaliya ama sameyneysa hawl la canshuuri karo.

Waa maxay ilaha dakhliga ee Dowladda?

Ilaha dakhli ee dawladda waa, ilo-dakhli oo cashuureed iyo ilo dakhli oo aan cashuur ahayn. Ilaha dakhli ee canshuuraha ah waxaa kamid ah canshuurta dakhliga qofka, canshuurta dakhliga kirada, canshuurta iibka/gadidda, canshuurta waddo-marista, iyo khidmaha adeegyada, ganaaxyo, iyo kuwo kale oo ku qoran xeerka dakhliga.

Yaa Ururinaya Canshuurta?

Canshuurta Dowladda Koonfur Galbeed Soomaaliya waxaa mas'uul ka ah Wasaaradda Maaliyadda. Wasaaraddu waxay adeegsan kartaa Wakiillo Cashuur-ururin oo la aqoonsan yahay, sida ku xusan Xeerka Dakhliga.

Waa maxay is-diiwaangelinta canshuur-bixiyaha?

Is-diiwaangelinta canshuur-bixiyuhu waa hab Wasaaradda Maaliyaddu ku aqoonsato qof, ganacsi ama hay'ad leh dakhli canshuur-gal. Marka aad is-diiwaangeliso, waxaad noqonaysaa canshuur-bixiye sharciyeysan oo si buuxda uga muuqda nidaamka dakhliga ee dowladda.

Maxaa lagu helaa marka la is-diiwaangeliyo?

Markaad is-diiwaangeliso, waxaad helaysaa Lambarka Aqoonsiga Canshuur-bixiyaha oo kuu gaar ah. Lambarkan waxaa loo adeegsada dhammaan arrimaha canshuuraha, sida bixinta canshuurta, buuxinta foomamka, helitaanka rasiidhada, iyo xiriir kasta oo aad la yeelato Wasaaradda Maaliyadda.

Maxaa dhacaya haddii aanan isku diiwaangelin waqtiga loogu talagalay?

Haddii canshuur-bixiyaha ama qofka uusan isku diiwaangelinin waqtiga loogu tala galay oo 15 maalmood gudahood, waxaa ku dhacaya ganaax 5% ah oo lagu xisaabiyo canshuurta ku waajibtay qaybtaas, bil kasta oo uu diiwaangelinta ka maqnaado. Ganaaxu wuxuu soconayaa ilaa qofku ka iska diiwaan geliyo.

Sidee ayuu canshuur-bixiyuhu u gudbin karaa cabasho?

Canshuur-bixiyuhu wuxuu cabasho u gudbin karaa Wasaaradda Maaliyadda haddii uu ka tabanayo go'aanka canshuurta, ganaax la saaray, ama arrin kale oo khuseysa canshuuraha. Cabashada waa in lagu gudbiyaa qaab qoraal ah oo si faahfaahsan u sharaxaya sababta cabashada.

Goorma ayaa la gudbiyaa cabashada, maxaase la socda?


Cabashada waa in lagu gudbiyaa 30 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda go'aanka la gaaray. Waa in lagu lifaaqo dukumentiyada caddeynaya cabashada, sidoo kalena waa in la bixiyaa qaybta canshuurta aan muranku ku jirin.

Waa sidee hanaanka xallinta cabashada?

Guddiga Xallinta Cabashada ayaa baaraya cabashada wuxuuna soo saaraa go'aan 60 maalmood gudahood. Go'aanka guddiga wuxuu noqonayaa kama dambays, hase yeeshee canshuur-bixiyuhu wuxuu xaq u leeyahay inuu arrinta u gudbiyo maxkamad haddii uusan ku qanacsanayn go'aanka guddiga.


Waa maxay xuquuqda Cashuur-bixiyaha?

Xuquuqda Cashuur-bixiyaha waa:



Waa maxay waajibaadka canshuur-bixiyaha?

Waajibaadka Cashuur-bixiyaha waa inuu:





CUTUBKA 2AAD: CANSHUURTA MACAASHKA SHAQAALAHA

Waa Maxay canshuurta macaashka shaqaalaha?

Canshuurta macaashka shaqaalaha waa waa canshuur laga qaado lacagta qofka uu ka helo shaqo uu u hayo loo-shaqeeye, ha ahaato dowlad, shirkad, ganacsi, ama hay'ad.

Waa kuwee dakhliyada canshuur-galka ah?

Dakhliyada canshuur-galka ah waa dhammaan lacagaha iyo faa'iidooyinka uu shaqaale ka helo shaqo uu u hayo loo-shaqeeye gudaha Koonfur Galbeed Soomaaliya. Waxaa ka mid ah mushaharka joogtada ah, xuquuq maalmeed, gunooyin, lacagta fasaxa la qaato ama la lacageeyo, saacadaha shaqada ee dheeraadka ah, lacagta shaqo-ka-bixista, iyo abaalmarin kasta oo shaqo. Sidoo kale waxaa ku jira xuquuq kasta oo qofku helo magac mushahar ama adeeg shaqo oo uu u qabto loo-shaqeeye.

Immisa ayaa la bixiyaa Canshuurta macaashka shaqaalaha?

Canshuurta macaashka shaqaalaha waxaa lagu qaadaa nidaam sii kordhaysa marka qofka dakhligiisa uu kordho. Canshuurta waxaa lagu xisaabiyaa dakhliga canshuur-galka ah ee qofka helo, waxaana loo kala saaraa heerar kala duwan sida ku cad jadwalka hoose:

Dakhliga Canshuur-Galka ee Billaha	Qiimaha Canshuurta
0 - \$100	0% (Canshuur-dhaaf)
\$101 - \$500	6%
\$501 - \$1,500	12%
\$1501 ama Ka badan	18%

Sidee loo bixiyaa Canshuurta macaashka shaqaalaha?

Loo-shaqeeyaha ayaa bil kasta ka jaraya canshuurta ku waajibta shaqaalaha, wuxuuna si toos ah ugu wareejinayaa Wasaaradda Maaliyadda ee Dowladda Koonfur Galbeed Soomaaliya.

Maxaa dhacaya haddii canshuurtan lagu bixin waqtiga loogu talagalay?

Haddii qofka uusan waqtigeeda ku gudbin ama ku bixin canshuurta dakhliga qofka, waxaa ku dhacaya ganaax u dhigma 10% oo ah canshuurta qofka ku waajibtay.



CUTUBKA 3aad: CANSHUURTA MACAASHKA GANACSIGA

Waa Maxay Canshuurta Macaashka Ganacsiga ?

Canshuurta macaashka ganacsiga waa canshuur lagu soo rogo qof kasta oo sannad canshuureed gudihiisa ka hela dakhli canshuur-gal ah oo ka yimaada hawl ganacsi, ha noqoto ganacsi yar, dhexe, ama mid weyn.

Maxaa loola Jeedaa Ganacsiyada Yar, Dhexe iyo Kuwa Weyn?

Ganacsiga yar waxaa loola jeedaa marka macaashka guud ee sanadka qofka uu ka helo hawl ganacsi uu ka yar yahay \$10,000.

Ganacsiga dhexe waa marka macaashka guud ee sanadka ka uu qof ka helo hawl ganacsi ay u dhexeyso \$10,000 ilaa \$49,999.

Ganacsiga weyn waxaa loola jeeda marka macaashka guud ee sanadlaha uusan ka yareyn \$50,000. Ganacsiyada waaweyn waxaa kamid ah Bangiyada, Xawaaladaha, Shirkadaha isgaarsiinta, Biyaha iyo Korontada.

Immisa ayaa la bixiyaa canshuurta macaashka ganacsiga?

Dakhliga canshuur-galka ah ee qof ka hela hawl ganacsi sanad canshuureed gudihiisa waxaa lagu canshuuraa qiimaha hoos ku xusan oo ku saleysan heerka ganacsiga:

Heerka Ganacsiga	Qiimaha Canshuurta Sanadlaha
Ganacsiga Yar	\$150 oo go'an
Ganacsiga Dhexe	\$150 oo lagu daray 1.5% dakhli kasta oo canshuur-gal ah oo ka badan \$10,000
Ganacsiga Wayn	\$750 oo lagu daray 18% dakhli kasta oo canshuur-gal ah oo ka badan \$50,000

Sidee loo bixiyaa Canshuurta Macaashka Ganacsiga?

Habka bixinta canshuurta macaashka ganacsiga waxa uu ku xiran yahay heerka ganacsiga. Ganacsiyada yar iyo kuwa dhexe waxa ay bixinayaan canshuurta sanadlaha laba qaybood, midkiiba 50% oo lagu bixinayo ugu danbeyn 31 Janaayo iyo 31 Luulyo. Halka ganacsatada waa weyn ay u kala bixinayaan afar qaybood midkiiba 25% oo lagu bixinayo ugu danbeyn 31 Maarso, 30 Juun, 30 Sebtember iyo 31 Diseembar.

Maxaa dhacaya haddii canshuurta aan lagu bixin waqtiga loogu talagalay?

Haddii ganacsadaha uusan waqtigeeda ku bixin canshuurta macaashka ganacsiga, waxaa lagu waaji-binayaa ganaax dhan 10% oo lagu xisaabiyo canshuurta macaashka ee sannadkaas ku waajibtay.



CUTUBKA 4aad: **CANSHUURTA DAKHLIGA KIRADA**

Waa maxay canshuurta dakhliga kirada?

Canshuurta dakhliga kirada waa canshuur lagu soo rogo lacag kasta oo laga helo kireynta hanti lagu isticmaalo gudaha Koonfur Galbeedka Soomaaliya, sida hanti ma-guurto ama hanti guurto ah.

Hantida ma-guurtada waxaa ka mid ah dhulka, guryaha iyo dhismayaasha kale ee la kireeyo, halka hantida guurtada ay noqon karto baabuur, qalab warshadeed, mishiinno ama agab ganacsi oo la adeegsado.

Immisa ayaa la bixiyaa canshuurta dakhliga kirada?

Qadarka canshuurta dakhliga kirada waa **5%** dakhligga kirada hantida.

Yay ku waajibtaa bixinta canshuurta dakhliga kirada?

Canshuurta dakhliga kirada waxaa laga raba oo mas'uul ka ah milkiilaha hantida ama qof kasta oo awood u leh inuu hanti kireeyo.

Goorma ayaa la bixiyaa Canshuurta Dakhliga Kirada?

Canshuurta dakhliga kirada waa in lagu bixiyaa **15** maalin gudahood laga bilaabo taariikhda lacagta kirada la helo.

Ma jiraan hanti aan laga rabin Canshuurta Dakhliga Kirada?

Haa, waxaa jira hanti laga dhaafayo canshuurta dakhliga kirada sida goobaha cibaadada, dugsiyada qur'aanka, iyo hanti walba oo loo adeegso ujeedooyin beer ah.

Maxaa laga raba milkiilaha hantida?

Milkiilaha hantida waa inuu Wasaaradda Maaliyadda ku wargeliyaa faahfaahinta heshiiska kirada marka uu kireeyo hanti uu leeyahay sida magaca iyo xogta labada dhinac, goobta iyo faahfaahinta hantida la kireeyay, Lambarka Aqoonsiga Canshuur-bixiyaha ee kireeyaha, muddada heshiiska, dakhliga guud ee kirada, iyo qadarka canshuurta ku waajibtay.



CUTUBKA 5aad: **CANSHUURTA ISKU-SOCODKA BADEECADAHA**

Waa maxay Canshuurta Isku-socodka Badeecadaha?

Canshuurta Isku-socodka Badeecadaha waa canshuur laga qaado qiimaha badeecadaha/alaabaha ganacsiga ee lagu raro baabuur ganacsi si loo sii iibiyo ama la qaybiyo, kuna safra waddooyinka gudaha Koonfur Galbeed Soomaaliya.

Sidee loo qaadaa Canshuurta Isku-socodka Badeecadaha?

Canshuurta Isku-socodka Badeecadaha waxaa la qaadaa marka badeecadaha ganacsiga lagu raro baabuur ganacsi oo mara waddooyinka Koonfur Galbeed Soomaaliya. Canshuurtu waxay dhacdaa laba jeer oo kala ah ah, marka badeecaddu soo gasho gudaha Koonfur Galbeed iyada oo ka imaanaysa meel ka baxsan Koonfur Galbeed, iyo marka ay ka baxayso gudaha oo loo raro deegaan kale. Marka canshuurta lagu bixiyo gelitaanka, isla badeecadda dib looma canshuuro marka ay baxdo, si looga fogaado in alaabta laba jeer la canshuuro.

Halkee lagu qaadaa Canshuurta Isku-socodka Badeecadaha?

Canshuurtan waxaa lagu qaadaa goobaha dakhli ururinta oo ay Wasaaradda Maaliyaddu u asteaysay sida baraha kantaroolka iyo waddooyinka rasmiga ah ee ganacsigu isticmaalo.

Immisa ayaa la bixiyaa Canshuurta Isku-socodka Badeecadaha?

Qadarka canshurta isku-socodka badeecadaha waa sida ku cad jadwalka hoose:

Nooca Baabuurka iyo Badeecadda	Laga Raro Muqdisho Loona Wado KGS	Alaabta u socota meel ka baxsan KGS (Transit)	Laga Raro KGS un Socota Muqdisho	Alaabta u socota KGS
Iveco	\$251	\$232	\$202	\$129
Tarel	\$343	\$274	\$217	\$244
N3 buuxa	\$400	\$255	\$152	\$117
N3 haaf ah	\$200	\$175	\$150	\$100
N3/ Caws/Caag faaruq	\$125	\$125	\$125	\$125
B/Badarka N-3	\$130	\$109	\$87	\$43
N3 cusbo	\$75	\$70	\$55	\$50
N3 Yuuro buuxa	\$430	\$208	\$165	\$132
N3 Yuuro haaf ah	\$215	\$170	\$140	\$100
CN Meydle buuxa	\$270	\$170	\$130	\$100
CN Meydle haaf ah	\$200	\$150	\$100	\$80
UD 8 boole buuxa	\$150	\$87	\$65	\$65
UD 8 boole Haaf ah	\$100	\$80	\$70	\$65
L6	\$130	\$113	\$43	\$78

Dhayno haaf ah	\$105	\$52	\$39	\$39
Dhayno haaf ah	\$80	\$70	\$60	\$65
JN-10	\$105	\$52	\$43	\$35
JN-10 haaf ah	\$80	\$50	\$45	\$40
Kanter buuxa	\$100	\$75	\$65	\$55
Kanter haaf	\$60	\$45	\$40	\$30
ZV	\$143	\$122	\$95	\$87
Homy	\$15	\$12	\$10	\$10

Yaa bixinaya Canshuurta Isku-socodka Badeecadaha?

Canshuurta Isku-socodka Badeecadaha waxaa bixinaya daraawalka baabuurka ganacsiga ee wada badeecadaha. Daraawalka waa mas'uulka bixinta lacagta marka uu maro goobaha rasmiga ah ee kantaroolka, waxaana la siinayaa rasiid caddeynaya bixinta canshuurta.



CUTUBKA Gaad: CANSHUURTA SOO-DHOOFINTA

Maxaa Ioola jeedaa Canshuurta Soo-dhoofinta?

Canshuurta soo-dhoofintu waa canshuur lagu soo rogo badeecado gaar ah ee dalka dibaddiisa laga keeno oo soo gala gudaha Dowladda Koonfur Galbeed Soomaaliya. Canshuurtaan waxa ay khusaysaa oo keliya jaadka, sigaarka iyo tubaakada.

Immisa ayaa la bixiyaa Canshuurta Soo-dhoofinta?

Qadarka canshuurta soo-dhoofinta waa sida ku cad jadwalka hoose:

Magaca Badeecada	Cabirka	Qadarka Canshuurta
Jaad	Jawaan (1kg)	\$ 2.50
Sigaar	Kartoon	\$ 3.00
Tubaako	Kartoon	\$ 1.00



CUTUBKA 7aad: **CANSHUURTA IIBKA/GADISTA**

Waa maxay Canshuurta libka/Gadista?

Canshuurta libka ama gadista waa canshuur lagu soo rogo badeecadaha iyo adeegyada uu iibiyo qof ama shirkad ku shaqeysa ganacsi gudaha Dowladda Koonfur Galbeed Soomaaliya. Canshuurtani waxay ku dhacdaa marka badeecad la iibiyo ama adeeg ganacsi la bixiyo.

Sidee loo qaadaa Canshuurta libka?

Canshuurta iibka waxaa laga qaadaa mar kasta oo ganacsi uu sameeyo is-dhaafsi badeecad ama adeeg canshuur-gal ah. Canshuurta lagu soo rogo is-dhaafsigaan waxay ku salaysan tahay qadarka uu bixiyo qofka adeegga ama badeecadda qaadanaaya, taas oo ah qiimaha rasmiga ah ee la isku afgartay.

Marka qof uu iibiyo badeecad ama uu bixiyo adeeg, lacagta uu macaamilku bixiyo ayaa noqota qiimaha canshuur-galka ah, waxaana waajib ku ah ganacsadaha inuu canshuurtaas ka jaro oo uu ku wareejiyo Wasaaradda Maaliyadda.

Immisa ayaa la bixiyaa Canshuurta libka?

Canshuurta iibka ama gadista waxaa la bixiyaa 5% qiimaha is-dhaafsiga. Tani waxay ka dhigan tahay in ganacsadaha uu bixinayo boqolkiiba shan ee lacagta uu macaamilku ku bixiyo badeecadda ama adeegga.

Yay ku waajibtaa Canshuurta libka?

Canshuurta iibka waxa ay ku waajibtaa qofka helaya badeecadda ama adeegga, maadaama uu yahay kan bixiya lacagta is-dhaafsiga. Macaamilka ayaa bixinaya canshuurta, halka ganacsadaha uu yahay kan ururiya oo ka jara qadarka iibka waqtiga lacag-bixinta, kuna wareejiyo Wasaaradda Maaliyadda.

Goorma ayaa la bixiyaa Canshuurta libka?

Canshuurta iibka waxaa la bixiyaa dhamaadka bil kasta. Ganacsadaha ayaa ururiya canshuurta inta lagu guda jiro bisha, kadibna wuxuu ku wareejiyaa Wasaaradda Maaliyadda marka bisha dhammaato.

Waa maxay Waajibaadka Ganacsadaha?

Ganacsadaha waxaa ku waajib ah inuu warbixin canshuureed u gudbiyo Wasaaradda Maaliyadda ka hor 15-ka bisha ku xigta xilli canshuureedka. Warbixinta waa in ay ku jirtaa magaca ganacsadaha, goobta ganacsiga, Lambarka Aqoonsiga Canshuur-bixiyaha, tirada iyo qiimaha guud ee dhammaan wax-is-dhaafsiyada canshuur-galka ah ee lagu sameeyay xilligaas, qadarka canshuurta iibka ee la ururiyay, iyo xog kasta oo kale oo ay Wasaaraddu u baahan tahay si loo hubiyo hufnaanta iyo saxnimada canshuur-bixinta.

Maxaa dhacaya haddii qofka ka habsaamo Canshuurta libka?

Haddii qofka uusan waqtiga loogu talagalay ku bixin canshuurta iibka ee xilli canshuureedka, waxaa ku dhacaya ganaax dhan 10%, kaas oo lagu xisaabiyo canshuurta iibka ee xilligaas la ururiyay.



CUTUBKA 8aad: CANSHUURTA RAKAABKA DIYAARADAHAA

Waa maxay Canshuurta Rakaabka Diyaaradaha?

Canshuurta rakaabka diyaaradaha waa canshuur lagu soo rogo tikidh kasta oo loo iibsado duulimaad gudaha ah oo ka baxaya gudaha Dowladda Koonfur Galbeed Soomaaliya.

Immisa ayaa la bixiyaa Canshuurta Rakaabka Diyaaradaha?

Canshuurta rakaabka diyaaradaha waxaa laga qaadaa \$10 tikidh kasta oo loo iibsado duulimaad gudaha ah oo ka baxaya gudaha Koonfur Galbeed Soomaaliya.

Yaa bixinaya Canshuurta Rakaabka Diyaaradaha?

Canshuurta rakaabka diyaaradaha waxaa bixinaya rakaabka ku qoran tikidhka, marka uu tikidhka iibsanayo. Marka qofku goosto tikidh duulimaad gudaha ah, qayb ka mid ah lacagta uu bixinayo waxay noqotaa canshuurta rakaabka.

Yaa ururinaya Canshuurta Rakaabka Diyaaradaha?

Shirkadda diyaaradaha ama wakiilada iibinaya tikidhada gudaha ayaa ururiya lacagta canshuurta rakaabka diyaaradaha.

Sidee loo bixiyaa Canshuurta Rakaabka Diyaaradaha?

Shirkadda diyaaradda ama wakiilada tikidhada ayaa warbixin bille ah u gudbinaya Wasaaradda Maaliyadda ka hor 15-ka bisha ku xigta xilliga canshuureedka. Warbixintan waa in ay ku jirtaa tirada guud ee tikidhada duulimaadyada gudaha ee la iibiyay, qadarka canshuurta la ururiyay, iyo xog kasta oo kale oo ay Wasaaraddu u baahan tahay.

Maxaa dhacaya haddii canshuurta rakaabka diyaaradaha aan lagu bixin waqtiga loogu talagalay?

Haddii qofka uusan waqtigeeda ku gudbin warbixinta canshuurta rakaabka diyaaradaha ee xilli canshuureedka, waxaa ku dhacay ganaax dhan 10%, kaas oo lagu xisaabiyo qadarka canshuurta ee la gudbin lahaa xilligaas.

Ma jiraan qolyo aan laga rabin Canshuurta Rakaabka Diyaaradaha?

Haa, waxaa jira xaalado iyo dad gaar ah oo laga dhaafay bixinta canshuurta rakaabka diyaaradaha, sida:



Carruurta ka yar laba sano



Duulimaadyada dowladda



Bukaanada caafimaadka degdegga ah.



CUTUBKA 9aad: **CANSHUURTA KALA-WAREEJINTA/ISTAAMBADA**

Waa maxay Canshuurta Kala-wareejinta/Istaambada?

Canshuurta Kala-wareejinta/istaambada waa canshuur lagu soo rogo dukumentiyada sharciyeysan ee caddeynaya kala wareejinta hanti gudaha Koonfur Galbeed Soomaaliya. Canshuurtani waxay ku dhacdaa marka la sameeyo heshiis, wareejin, ama nootaayaynta dukumentu muujinaya in hanti lagu wareejinayo shaqsi kale ama hay'ad kale.

Yaa bixinaya Canshuurta Istaambada/Kala-wareejinta?

Canshuurta Istaambada/kala-wareejinta, waxaa bixinaya qofka ama hay'adda gudbineysa dukumentiga si loo nootaayeeyo ama loo sharciyeeyo. Marka dukumentu lagu wareejinayo hanti la horgeeyo nootaayo ama hay'ad sharci ah, cidda soo gudbisay ee dooneysa in dukumentiga loo xaqiijiyo ayaa ah tan laga rabo bixinta canshuurta istaambada.

Immisa ayaa la bixiyaa Canshuurta Istaambada/Kala-wareejinta?

Canshuurta Istaambada ee lagu bixiyo wareejinta hantida—ha noqoto hanti guurto ama hanti ma-guurto—waa 3%, taas oo lagu xisaabinayo qiimaha hantida lagu kala wareegayo.

Goorma ayaa la bixiyaa Canshuurta Istaambada/Kala-wareejinta?

Canshuurta Istaambada waa in la bixiyo ka hor ama xilliga dukumentiga la nootaayeeyo. Marka dukumentu lagu wareejinayo hanti la keenayo si loo sharciyeeyo, lacagta istaambada waa in lagu wareejiyaa Wasaaradda Maaliyadda isla waqtigaas, si dukumentiga loo diiwaangeliyo loona ansixiyo.

Maxaa dhacaya haddii aan si sax ah loo bixin Canshuurta Istaambada/Kala-wareejinta?

Haddii hanti waajib ku ah canshuurta Kala-wareejinta aan si sax ah loo bixin ama aan la saarin Istaambada, waxaa lagu soo roгаа ganaax dhan 10%, kaas oo lagu xisaabiyo qadarka canshuurta Kala-wareejinta ku waajibay.



CUTUBKA 10aad: **CANSHUURTA HANTIDA**

Waa maxay Canshuurta Hantida?

Canshuurta hantidu waa canshuur lagu soo rogo qiimaha hantida ku taalla gudaha Dowladda Koonfur Galbeed Soomaaliya. Canshuurtani waxay ku salaysan tahay qiimeynta rasmiga ah ee hantida, waxaana lagu dabaqaa dhul, guryo, dhismayaal ganacsi, warshado iyo hanti kale oo ma-guurto ah oo ku taalla deegaanada la canshuuro.

Immisa ayaa la bixiyaa canshuurta hantida?

Qadarka canshuurta hantida waxaa lagu saleeyaa nooca iyo heerka hantida sida ku cad jadwalka hoose:

Nooca Hantida	Heerka Hantida	Qadarka Canshuurta
Hanti Deegaan ah	A	\$120
	B	\$90
	C	\$60
	D	\$30
Hanti Ganacsi ah	A	\$200
	B	\$150
	C	\$90
	D	\$50
Hanti Warshad ah	A	\$250
	B	\$150
	C	\$100
	D	\$50
Hanti Beer ah	-	Canshuur dhaaf

Sidee loo bixiyaa la bixiyaa Canshuurta Hantida?

Canshuurta hantida waxaa la bixiyaa hal mar sannadkii, waxaana waajib ah in la bixiyo ugu dambayn 31-ka Maarso see sanad kasta.

Maxaa dhacaya haddii aan waqtigeeda lagu bixin Canshuurta Hantida?

Haddii qofka uusan waqtiga loogu talagalay ku bixin canshuurta hantida, waxaa ku dhacaya ganaax dhan 10%, kaas oo lagu xisaabiyo qadarka canshuurta hantida ee ku waajibay.

Ma jiraan goobo laga dhaafay Canshuurta Hantida?

Haa, waxaa jira goobo laga dhaafay canshuurta hantida sida xafiisyada dowladda, masaajidda, dusgiyada qur'aanka, iyo beeraha.



CUTUBKA 11aad: SHATIYADA GANACSIGA

Waa maxay Khidmadaha Shatiyada Ganacsiga?

Khidmadaha shatiyada ganacsigu waa lacag sanadle ah oo laga qaado qof kasta oo doonaya inuu helo shati ganacsi cusub ama ay cusboonaysiiso shati hore u jiray si ay sharci ahaan ugu shaqeeyaan gudaha Koonfur Galbeed Soomaaliya.

Immisa ayaa la bixiyaa Khidmadaha Shatiyada Ganacsiga?

Khidmadda sannadlaha ah ee shatiga ganacsigu waxay ku xiran tahay heerka ganacsiga (yar, dhexe, ama weyn) iyo nooca hawsha ganacsi, sida ku qeexan xeerka dakhliga. Jadwalkan hoose wuxuu muujinayaa qadarka rasmiga ah ee laga rabo ganacsiyada kala duwan:

Nooca Ganacsiga	Lacagta Khidmada Sanadlaha		
	Yar	Dhexe	Weyn
Supermarket	\$150	\$250	\$350
Dukaamo	\$30	\$70	\$100
Hoteelada La Dego	\$100	\$250	\$300
Hotel leh Makhaayad	\$100	\$300	\$400
Shirkadaha Isgaarsiinta	\$200	\$300	\$600
Makhaayadaha	\$50	\$150	\$250
Xawaaladaha	\$50	\$100	\$200
Shirkadaha Korontada	\$100	\$200	\$300
Shirkadaha Biyaha	\$75	\$200	\$250
Jumladleyda Shidaalka	\$50	\$100	\$200
Qalabka Baabuurta	\$50	\$100	\$150
Alaabada Is-carfinta iyo Is-qurxinta	\$25	\$75	\$100
Soosaare Saliidda Cuntada Laga Dhaliyo	\$25	\$50	\$100
Qalabka Xafiiska/Guryaha	\$25	\$50	\$100
Cuntooyinka Fudud iyo Cabitaanada Qabow	\$20	\$50	\$75
Shirkad (Adeeg Bixisa)	\$100	\$200	\$75
Farmashi Jumlo ah	\$50	\$100	\$200

Sidee loo bixiyaa Khidmadda shatiga Ganacsiga?

Khidmadda shatiga Ganacsiga waxaa loo bixiyaa sannadle kana bilaabmaya xilliga aad bixisay lacagta Khidmadda diiwaangelinta shatiga.

Maxaa dhacaya haddii aan waqtigeeda lagu bixin Khidmadaha Shatiyada Ganacsiga?

Haddii qofka uusan waqtiga loogu talagalay ku bixin lacagta shatiyada ganacsiga, waxaa laga qaadayaa ganaax dhan 10%, kaas oo lagu xisaabiyo qadarka shatiga ganacsiga ee laga rabay.



CUTUBKA 12aad: CANSHUURTA DIIWAANGELINTA BAABUURTA

Waa maxay Canshuurta Diiwaangelinta Baabuurta?

Canshuurta diiwaangelinta baabuurta waa lacag lagu soo rogo baabuur kasta oo isticmaala waddooyinka Dowladda Koonfur Galbeed Soomaaliya.

Yaa laga qaadaa Canshuurta Diiwaangelinta Baabuurta?

Canshuurta diiwaangelinta baabuurta waxaa laga qaadaa baabuur kasta oo dalka loo soo dhoofiyo isla markaana markii ugu horreysay lagu diiwaangeliyo milkiile ku nool gudaha Koonfur Galbeed Soomaaliya.

Immisa ayaa la bixiyaa canshuurta Diiwaangelinta Baabuurta?

Qadarka canshuurta diiwaangelinta baabuurta waa sida ku cad jadwalka hoose:

Nooca Baabuurka	Lacagta
Baabuur yar oo qaadi kara kaliya afar qof oo rakaab ah ama ka yar, awoodda matoorkiisana ay ka yar tahay 2,000 cc	\$30
Baabuur yar oo qaadi kara afar qof oo rakaab ah ama ka badan, awoodda matoorkiisana ay tahay 2,000 cc ama ka badan	\$30
Gaari xamuul, leh hal ama labo kabiin ama loori loogu tala galay inuu qaado alaabaha, lehna miisaan guud oo ka yar 3.5 mitir tan.	\$40
Gaari xamuul, leh hal ama labo kabiin ama loori loogu tala galay inuu qaado alaabaha, lehna miisaan guud oo ah 3.5 mitir tan, ama ka badan.	\$100
Caasi/Hoomey ama bas loogu tala galay inuuqaado 8 rakaab ama ka badan.	\$40



CUTUBKA 13AAD: CANSHUURTA WADDO-MARISTA

Waa maxay Canshuurta Waddo-marista?

Canshuurta waddo-marista waa lacag laga qaado baabuur kasta oo isticmaala waddooyinka ay maamusho Dowladda Koonfur Galbeed. Lacagtan waxaa lagu maalgeliyaa dayactirka, nabadgelyada, iyo adeegyada kale ee la xiriira waddooyinka.

Yay ku waajibtay Canshuurta Waddo-marista?

Canshuurta waddo-marista waxaa laga rabaa milkiilaha baabuurka ama qofka wada.

Sidee ayaa loo bixiyaa Canshuurta Waddo-marista?

Canshuurta waddo-marista waxaa la bixiyaa saddex biloodle, waxaana marka la bixiyo la helaa calaamad/istiikar caddeynaysa in canshuurta la bixiyay. Calaamaddan/Istiikarkan waa in lagu dhajiyaa meel muuqata oo kamid ah baabuurka, waxa uuna shaqeynayaa muddo saddex bilood ah laga bilaabo maalinta lacag-bixinta.

Immisa ayaa la bixiyaa Canshuurta Waddo-marista?

Qaddarka canshuurta waddo-marista waxa uu ku xiran yahay nooca baabuurka, culeyska guud iyo awoodda matoorka, sida ku cad jadwalka hoose:

Nooca Baabuurka	Lacagta
Mooto Laba Lugeey	\$9
Bajaaj ama Tuk-tuk	\$15
Baabur yar oo aan ka badneyn saddex kursi oo rakaab ah	\$20
Baabuur yar oo ka badan saddex kursi oo rakaab ah	\$30
Hoomeey ama bas qaadi kara 8 qof oo rakaab ah ama ka badan	\$45
Iska-roge ama Cara Gedis	\$62
Xamuul, Loori, Cagaf, tareelle	\$92

Halkee lagu bixiyaa Canshuurta Waddo-marista?

Canshuurta waddo-marista waxaa lagu bixiyaa goobaha kantarool ee ay astaysay Wasaaradda Maaliyadda, halkaas oo ay joogaan dakhli-ururiyayaal la aqoonsan yahay. Baabuurta waxaa lagu joojin karaa kantaroolada si loo hubiyo bixinta canshuurta, waxaana halkaas lagu qaadaa lacagta laguna bixiyaa shaabadda caddeynaya in canshuurta la bixiyay.

Maxaa dhacaya haddii baabuur la wado iyadoo aan la bixin canshuurta waddo-marista?

Haddii baabuur la wado iyadoo aan la bixin canshuurta waddo-marista, milkiilaha ama qofka wada gaariga waxaa waajib ku ah in uu bixiyo canshuurta waddo-marista ee aan la bixin, oo lagu daray ganaax 10% ah oo lagu xisaabiyo canshuurta aan la bixin.

Haddii baabuurka la sii wado muddo ka badan 30 maalmood iyada oo aan weli la bixin canshuurta waddo-marista, waxaa sii kordhaya ganaax dheeri ah oo ah 50% oo lagu xisaabiyo isla canshuurta aan la bixin.




CUTUBKA 14AAD: KHIDMADA DAL-KU-JOOGGA IYO OGOLAANSHAHA SHAQO

Waa maxay khidamada dal-ku-joogga ama fiisaha deggennaashaha?

Waa khidmad laga qaado dadka wata ama haysta Baasaboor ajnabi ah.

Imisaa ayaa la bixiyaa khidamada dal-ku-joogga ama fiisaha deggennaashaha?

Khidmadda Dal-ku-joogga waxa ay ku xiran tahay kolba muddada aad rabo waxaana la bixiyaa:



Waa maxay khidmadda Ogolaanshaha shaqo?

Waa Khidmadda laga qaado dadka ajaanib-ka ah, ee loo ogolaaday in ay ka shaqaystaan gudaha deegaanada Koonfur Galbeed Soomaaliya.

Imisaa ayaa la bixiyaa khidmadda Ogolaanshaha shaqo?

Khidmadda ogolaanshaha shaqo ee dadka ajaannib ka ah waxaa la bixiyaa \$750 sannadka.

Wixii faahfaahin dheeraad ah, booqo Xarunta Waaxda Maamulka Dakhliga ee Wasaaradda Maaliyadda agagaarka Garoonka Dr. Ayub ee Magaalada Baydhabo, oo ku dhegan xarunta taraafikada.



+252 619 400 782
+252 629 400 782



www.mofswss.so
SRD@mofswss.so

"Biineeng biirodè ké bulaalane"



+252 619 400 782
+252 629 400 782



www.mofswss.so
SRD@mofswss.so